NHS SCOTLAND

DARYEELISTA CAAFIMAADKA BEELAHA ASAL AHAAN LAGA TIRADA BADAN YAHAY EE SCOTLAND

WARBIXIN SANNADLE AH XOGWARRAN KOOBAN OO AY DHIIBAYAAN GUDDIGA HOGAAMINTA IYO MAAREEYAHA XARUNTA WAX QABADKA QARANKA EE LOOGU TALA GALAY CAAFIMAADKA DADKA ASAL AHAAN LAGA TIRADA BADAN YAHAY

2002 – 2003

XOGWARRAN KOOBAN

Dikumentiganai wuxuu ka kooban yahay, warbixin sannadedlihii kooxda hagta xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay, iyo xogwarran kooban oo ay dhiibayso xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay iyo kooxdooda. Kooxda hagistu waxay bixisaa jiheynta guud ee xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay iyagoo isticmaalaya xubinamadooda khibradeed ee ay u leeyihiin Scotland oo dhan. Warbixintan wadajirka ahi waxay muujinaysaa xiriirka wadashaqeyneed ee ka dhaxeeya kooxda hagista iyo xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay ee lagu guulaystay ilaa iyo iminka.

Warbixintani waxay u qeybsan tahay laba qeybood. Qeybta koowaad waxay soo koobaysaa shaqada xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay . Qeybta labaadna waxay muujinaysaa horumarka ay gaareen adeegyada caafiamadka qaranka ee Scotland marka laga hadlayo dhaqangelinta siyaasadaha ku saabsan asalnimada iyo caafimaadka, gaar ahaan baahida lo qabo warqadi aheyd sinaan loo dhan yahay waaxda caafimaadka (2002)51. Warbixinta ka hadleysa horumarka sinaan loo dhan yahay ee qeybta labaad waxay muujinysaa siyaasadaha ugu waaweyn ee ay la timi xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay laga soo bilabo markii la bilaabay sinnaan loo dhan yahay sannadkii 2000. Waxay baaritaan ku sameysaa sida loo dhaqan geliyey sinaanta jinsiyadaha sannadkii ugu horreeyey waxayna si gaar u eegaysaa waxqabadyo gaar ah oo ku saabsan sharcigii arrimaha midibka (jinsiyadda), ee so baxay 2000. Waxaa kaloo ku jira howshan lafa guris qorshayaasha iyo waxqabadka sinnaan loo dhan yahay taasoo ku salaysan qoraalkii waaxda caafiamadka (2002) 51.

Marka lagu daro lafo gurista labada shaqo, waxay ka hadleysaa waxayaabihii la ogaaday kuwoodii ugu waaweynaa iyo soo jeedino la sameeyey taasoo ka caawin doonta guddiga inay bilaabaan qorshayashooda iyo inay qiyaasaan waxqabadka dhabta ah ee jira.

Si loo isticmalo waxyaalaha ka soo baxa lafaguristan waxaa la sameeyey nidaam tijaabo oo heer qaran ah kasnoo aanu rajeynayno inuu noqdo hage dhab ah oo ay isticmaalaan guddiyada iyo kuwa xilku saaran yahay. Intii lagu guda jirey sannadkii ugu horreeyey xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay oo ay la socdaan guddiyada hay'adda sinaanta midabka iyo kuwa xilku ka saaran yahay inay u hogaansamaan waxyal;aha laysaga baahan yahay iyo sidoo kale inay la wadaagaan ayna hirgeliyaan sida ugu fiican iyado lasii marayo shabakado qaran. Ujeedooyinka sannadka soo socda waxa weeye in laga gudbo siyaasad abuurid loona gudbo dhaqangelin.

Gudagal

Shaqada waxay ku salaysneyd baahida loo qabo RRAA 2000 iyo sinaanta loo dhan yahay ee warqadda waaxda caafimaadka. Waxay si dhab ah ugu baahsan tahay mas'uuliyadaha iskaashatooyinka adeegyada caafimaadka ee Scotland kuwaasoo qaabilsan Qorsheynta beesha, xuquuqda aadanaha, sinaanta iyo kala duwanaanshaha iyo dabcan in diiradda la saaro bukaanka iyo kasoo qaygelinta dadweynaha.

QEYBTA 1

Xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay waxaa maal geliya maamulka Scotland si loo kaalmeeyo adeegyada caafimaadka ee Scotland, gaar ahaan guddiyada caafimaadka si ay u bixiyaan ajende ku saabsan caafimaadka dadka laga tirada badan yahay. Xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay waxay shaqo bilowday 1dii Abriil 2002. Waxaa ka shaqeeya agaasime, labo mashruuc xogheyn, iyo saddex maamule mashruuc kuwaasoo diirada saara mudnaanaha siyaasadeed ee ugu horreeya, warbixin iyo tababarid. Waxaa intaa dheer xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay waxa ogaatay baahida loo qabo in lagu daro mudnaan afaraad oo ah horumarinta beesha.

Hadafka xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay waa in ay kaalmeyso ayna hubiso adeegyada caafimaadka, taasoo quseysa cabashooyinka beelaha asal ahaan laga tirada badan yahay ee la soocay iyo inay dhaqan geliso horumarinta adeegyo dhaqan ahaan suurta gal ah oo xasaasi ah oo ku salaysan siyaasad kasoo horjeeda xaqirista iyo waxqabad.

Habka ay siyaasaddu u shaqeyso.

Sannadkii lasoo dhaafay xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay dadka asal ahaan lag tirad badan yahay waxay ka kaalmeysay guddiyada iyo xilku ka saaran tahay sidii ay u horumarin lahaayeen qorshayaashooda ah sinaanta midabka iyo qorsheyaal ah sinaan loo wada dhan yahay iyadoo kala qeyb qaadanaysa hay'adda sinaanta midabka waxay sidoo kale maamushay habka dib u eegista ee heerka qaran ah.

Xarunta waxqadabka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay waxay kaalin weyn ka qaadatay sidii ay ula shaqeyn laheyd hay'adda sinaanta midabka taasoo dirtay farriin mideysan oo kaalmo leh oo ku socota ururada caafimaadka, farriintan oo ka duwan tan ka iminka ka jirta saddexda gobol ee kale ee ay ka kooban tahay United Kingdom. Qorsahaha awoodda badan ee aan iminka ku haysano Scotland wuxuu caafimaadka awood u siin kaara inuu hogaamiyo goobaha kale ee sinaanta midibka. Natiijada ka soo baxday waxqabadkan wadajirka ah waxay ahayd mid saameyn leh oo ku saleysan hogaamin iyo ka dhabayn ka timi madaxda sar sare. Tani waxay yareyn doontaa faa'iido darrida waxayna ku talogeli doontaa kala duwanaansaha dadka deegaanka ay ku kala duwan yihiin siyaasadaha iyo qorsheynta howlaha.

Arrimaha lagaga hadlay warbixintan waxay cadeynayaan in durba horumar la gaaray laga soo bilaabo markii la dhaqan geliyey sinaan loo dhan ayahy labo sano ka hor. Guddiyada iyo kuwa xilku saaran yahay waxay si laab furnaani ku muuqato uga soo jawaabeen baahidi loo qabey, inkastoo ay jireen kuwa u arkay qorsahan mid aan macno laheyn. Hirgelinta Qorshayaasha sinaanta midabka iyo qorshyalaal howgal lihi waxay si muuqata uga kaalmeeyeen ururo iyo dad gaar ah sidi ay u fahmi lahaayeen midab kala sooca loo dhan yahay iyo sidoo loo abuuri lahaa dadka deeganku iyan gartaan dhaqanka iyo isbedelada koox ahaaneed. Dad badan tani waa mid ku cusub, kalsoonida iyo aqoon u yeelashaduna way iman doonaan haddii waqti la siiyo. Waxaa weli u baahan in wax laga qabto ka dhaadhicinta ajendahan dhammaan guddiga iyo xubnaha, iyo sidoo kale sidoo loo dhisi lahaa kalsooni dhex marta beelaha, taasoo ku iman karta in la fuliyo ajendaha caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay.

Marka lagu daro baahida sharci ahaaneed iyo tan siyaasadeed ee guddiga mudnaano dhowr ayaa la muujiyey kuwaasoo u baahday diirad saarid gaar ah shabakado qaabeysan ayaa la abuuray si ay u qeybiyaan una dhaliyaan waxqabad fiican. Siyaasad ahaan kuwa waxaa ka mid ah socotada Gypsiga ah, magangalyo doonayaasha, iyo qaxootiga, horumarinta beesha, caafimaadka maskaxda, iyo shabakado kansarka.

Horumarinta Beesha: Kooxda maamulku waxay talo ku bixiyeen in tiirka afaraad ee wax qabadka xarunta waxqabadka qaranka ee caafimaadka dadka asal ahaan laga tira badan yahay uu ahaado horumarinta beesha. Xarunta waxqabadka qaranka ee caafiamadka dadka asal ahaan laga tiro badan yahay waxay asaaseen koox shaqo oo la shaqeysa ururada qaran ee dadka asal ahaan laga tiro badan yahay ee iminka jira si loo sii amba qaado ajendaha ah diirad saarista bukaanka iyo kasoo qeyb gelinta bukaanka iyadoo lala kaashanayo diirad saarista SEHD iyo qeybta tayada.

Caafimaadka Maskaxda iyo Ladnaanta/Isticmaal Xumida Maamulka Scotland waxay caafimaadka maskaxda u aqoonsadeen inay tahay mudnaan qaran, waxaa kale oo intaa dheer Guddiga Baxnaanada Maskaxdu waxay arrintan si gaar ugu xuseen howlahooda sannadkan. Si loo taakuleeyo arrintan qaran waxaa la rajeynayaa in la sameeyo shabakad heer qaran ah oo ay hirgeliyaan kuwa ka hooseeya xarunta waxqabadka qaranka caafimaadka ee dadka asal ahaan laga tirada badan yahay. Howshani waxay xooga saaraysaa sidii loo caddey lahaa heerka ay joogaan istiraatiijiyadaha caafimaadka maskaxda marka laga hadlayo guddiyada iyo kuwa xilku ka saaran yahay iyo sidoo kale inay qabtaan layli lagu ogaanayo ururada dadka asal ahaan laga tirada badan yahay. Waxa kale oo ay diirada saarayaan howlaha lagu hubinayo laguna barayo gudbints/isdhexgalka dhaqan ahaaneed ee caafimaadka maskaxda ee ka jira waxbarashada iyo tababaro ka jira dhammaan adeegyada daryeelka bulshada iyo caafimadka oo waqtigan lagu guda jiro.

Kansar: Codsiyo ay sameysay hay'adda sinaanta midabka , xarunta waxqabadka qaranka caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay waxay ogolaatay inay fududeyso habka la talinta marka la eegayo istiraatiijyada kansarka ee heerka qaran ah. Kooxo ka kooban hay'ado fara bada ayaa la sameeyey si ay u hormariyaan qeybo shaqooyinka ka mid ah kuwaasoo ka hadli doona gaar ahaan horumarinta beesha iyo baahida loo qabo baraarujinta caafimadka, wada shaqeynta waadjirka ah iyo kormeersi natiijo leh oo dhacda marwalba. Wadahadalo bilow ah ayaa lala sameeyey Macmillan Cancer Relief si loo helo jawaab wada jir ah si arrintan wax looga qabto gaar ahaan sidii loo heli lahaa xal dhab ah oo lagu maareeyo dhibaatooyin iyo arrimaha jira.

Socotada/Gypsy: Sinaanta loo dhan yahay ee Stocktake 2000 waxay muujisay dulduleelada ka muuqda waxqabadka, ka murugsanaan ay ka murugsan tahay isku day la'aanta in lala shaqeeyo socotada Gypsy iyo Magangelyo doonayaasha iyo qaxootiga.

Haddii aanu soo qadno socotada Gypsy, kulamo wada hadal oo la qabtay Janaayo 2003 ayaa lagu sameeyey guddi matala beelaha si an y u bilaabaan doodda ku saabsan muhimadda caafimaadka. Arrimaha wax laga qaban doono waxaa ka mid ah sameynta waxyaalo laysugu baraarujiyo caafimaadka, tijaabo baahida ay qabto beeshu, iyo isku xirnaansho heer qaran ah oo ku saabsan diiwaanada caafimaad ee gacanta lagu hayo.

Magan gelyo doonyaasha iyo Qaxootiga: Xarunta waxqabadka qaranka caafimaadka ee dadka asal ahaan laga tirada bada yahay waaxy ka qeyb qaadatay Golaha kusuoo darista qaxootida ee Scotland oo uu leeyahay maamulka Scotland si ay ula timaado qorshe qaran oo ah kusoo darista qaxootiga iyo magangelyo raadiyayaasha ee Scotland. Xarunta waxqabadka qaranka caafimaadka ee dadka asal ahan laga tirada badan

yahay waaxy qeyb muhiim ah ka qadan doontaa sidii ay uga kaalmeyn laheyd adeegyada caafimaadka qaranka sidii ay u dhaqan gelin lahaayeen warbixintii caafimaad ee Golaha Dhamaystirka Qaxootiga qorsheyaal daryeel bulsho oo ka mid ah ajendaha ballaaran ee sinaan loo dhan yahay.

Tababarista iyo Howlaha Horumarinta.

Muhiimadda ugu weyn ee xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay ay ka leedahay tababarista iyo howlaha horumarinta waxa weeye in ay sameyso istiraatiijiyad lagu hagaajinayo aqoonta, fikradaha dhaqan ahaan xasaasiga ah iyo xirfadaha shaqaalaha adeegyada caafimaadka qaranka si loogu qalabeeyo inay qabtaan adeegyo dhaqan ahaan aqoon loo leeyahay. Shabakada tababarista iyo howlaha horumarintu waxay sii fidineysaa ajendaha tababarista iyo horumarinta iyadoo usii mareysa waxqabad isku xiran. Waxaa la sameeyey manhaj loogu talo galay saddex qeybood oo ballaaran: aqoon iyo faham; qiimeynta kala duwanaanshaha iyo fikradaha dhaqan ahaan xasaasiga ah; iyo wadaxirir saameyn leh iyo isticmaalka/ururinta macluumaadka kuwa asal ahaan laga tirada badan yahay. Tijaabo heer qaran ah oo ah baahida shaqaalaha adeegyada caafimaadka qaranka ee Scotland ayaa la qabanayaa iyadoo lala kaashanayo mamulka Scotland si loo gaaro labada ajende ee kala ah sinaan loo dhan yahay iyo diirrad saarista bukaanka iyo kusoo darista bulshada. Howl qoraal ah qorshe mashruuc oo qoraal ah oo lagu kaalmeynayo Guddiyada Caafimaadka si ay u sameeyaan istiraatiijiyad tababareed ayaa la sameyn doonaa waxqabadyada kale waxaa ka mid ah bilaabista wargeys looga hadlayo horumarinta tababarista iyo harumarinta fikrada ah aqoon u lahaanshaha dhaqanka iyadoo lala kaashanayo waxbarsahada adeegyada caafimaadka qaranka ee Scotland.

Macluumaad, Kormeeris, iyo Shaqo Baaritaan.

Waxaa ka jirta Scotland la'aansho warbixin faahfaahsan oo ku saabsan asalnimada iyo caafimaadka, taasoo keenayso in go'aamada iyo mudnaansiinta lagu sameeyo iyadoo lagu saleynayo macluumaad laga soo qaatay England iyo Wales. Hadaf muhiim ah oo ay rabto xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay ayaa ah inay agaasinto nidaam macluumaad, sare u qaadista waxqabadka iyo inay liis gareyso waxyaalaha ay codsato hay'adda ururinta macluumaadka caafimaad ee dadka laga tirada badan yahay. Howshani waxay ku saleysan tahay dhaqangelin kormeeris jisni ah oo ay sameynayaan shaqo bixiyayaasha iyo aragtida qabashada adeegyada. xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka laga tirada badan yahay waxay ciyaartay door muhiim ah daraasad lagu sameeyey Jaamacadda Edinburgh iyadoo kala qeyb qaadatey qeybta macluumaad istaatiitikada, taasoo isku dayeysay inay u sameyso baaqyo mudooyinkii lasoo dhaafay macluumaadyad caafimaad ee Scotland.

Website ayaa iminka la sameyanayaa taasoo looga dan leeyahay inay noqoto meel ay kasoo baxaan macluumaadku koronto ahaan.

Maamulka Cudurada Raaga: Marka laga hadlayo nidaamka asaasiga ah Sonkorowga Scotland, faqradda 85, xarunta waxqabadka qaranka ee caafimaadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay waxaa loo xiisaaray inay soo qoraan warbixin ku saabsan ku baahsanaanta sokorowga ee dadka asal ahaan laga tirada badan yahay ee reer Scotland. Helitaanadii ugu horreeyey waxaa lasoo bandhigi doonaa bandhig caalami ah oo la qaban doono dhamaadka 2003

Daaweynta Haemoglabin: Koox shaqo ayaa diyaarinaya baahida qiimaynta loo qabo baritaanka arrintan.

QEYBTA 2

Qeybtani waxay ka hadleysaa horumarka ay gaareen adeegyada caafimaadka ee Scotland, marka laga hadlayo dhaqan gelinta sinaan loo dhan yahay warqaddi waaxda caafimaadka 2002 (51) iyo qorshayaasha simidda midabka.

Qeybta I : Sinaan loo dhan yahay

Sinaanta loo dhan yahay ee Stocktake waxaa la bilaabay sannadkii 2000 si loo ogaado xaalladda ogsoonaanta dhaqanka ee ka jirta ururada daryeelka caafimaadka. Afar arimood oo wax ka qabad u baahan ayaa la ogaaday. Fursadaha loo siman yahay; Hogaamin; Qorsheyn istiraatiiji ah iyo ku xisaabtamid. Iyadoo la isticmaalayo daabacaadi hagahi 51 warqadi waaxda caafimaadka (2002), maamulka Scotland ee adeegyada caafimaadka qaranka Scotland waxay soo jeediyeen barnaamij saddex sano ah oo leh hadafyo. Waxaa ka mid ah awoodsiinta ururka iyadoo loo sii marayo hogaamin natiijo leh; qiimeynta daraasada warbixineed oo ah xaaladda ay bulshadu ku sugan tahay khatarta ku jirta iyo inay sameeyaan qiimayn baahi caafimaad si ay u abuuraan caddeyn qorshe; baraarujin in la gaaro adeegyada, iyagoo hubinaya qabashada adeegyada dhaqan ahaan xasaasiga ah iyo baahida diimeed; baraarujinta fursadaha sinaanta gaar ahaan shaqaaleynta iyo xulushada iyo baraarujinta horumarinta beesha iyadoo la dhegaysanayo lagana soo qeyb geliyo dadka daryeelka ku sahaqada leh.

Qeybta II: Jawaabta Adeegyada Caafimaadk Qaranka ee Scotland ee ku jeedda Sinaanta midabka iyo Aqoon u lahaasnshaha Dhaqanka

Inkastoo weli wax badani noo harsan yihiin, waxaa muuqata waxqabad urur ahaaneed oo soo kordahaya si loo hormariyo arrimaha sinaanta gudaha adeegyada caafimaadka ee Scotland, taasoo wadata hagaajin muuqata marka la barbar dhigo heerka Stocktake. Dhammaan saraakiisha fulinta ee adeegyada caafimaadka qaranku 0waxay saxiixeen wax ka qabadka hogaanka ee hirgelinta sinaanta midabka si ay u muujiyaan u diyaar ahaantooda ay diyaarka u yihiin ajendahan.

Qorshayaasha Sinaanta Midabka iyo Qorshayaal Howlgal: Waxaa jiray wax ka qabadyo bilow ah iyo isbedel la'aan sidii loo fahmi lahaa baahida loo qabo dhaqangelinta qorshayaasha sinaanta midabka iyo qorshayaasha howlgalka ee sinaan loo dhan yahay. Arrimahaas waxaa ka mid ahaa cabsi laga qabo u hogaansami la'aanta, fahamis la'aanta qaabka mibad kala sooca baahsan xaqiraadda iyo diirad ku hayn la'aanta dadka asal ahaan laga badan yahay sababtuna tahay tiro yaraanta shacabka. Si kastaba ha ahaatee qorshayaashi sinaanta midabka iyo qorshayaashi howlgalka ee sinaan loo dhan yahay waxaa lagu dhamaystiray waqtigii loogu talo galay. Waxaa jirta horumar muuqda oo ka jira guddiyada caafimaadka gaar ahaan meelihii ay joogeen shaqaale diyaar u ah ama/iyo maareeye laabfuran. Xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay waxay kaalmeyn ka geysatay iyo haggis horumarinta qorshayaasha midab sinaanta iyo qorsheyaasha howlgalka. Qiimeyn wadajir ah oo heer qaran ah oo asaas ah ayaa la sameeyey iyadoo lala kaashanayo ururka sinaanta iyo midabka taasoo loo isticmaalo in lagu ogaado gondaloolooyinka iyo hagaajinta.

Dib-u-eegis heer Qaran – Ujeedooyin iyo Koobis: Dib -u- eegis heer qaran oo ah qorsheyaasha sinaanta midabka iyo qorshaha howlgalka ayaa waxaa qabtay xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaanta laga tirada badan yahay iyadoo la shaqeynaysa ururka sinaanta midabka.

Warbixinta ugu danbeysaa waxay bixin doontaa haggis lagu caawinayo guddiyada iyo kuwa xilku saaran yahay sidii ay u wanaajin lahaayeen una dhaqan gelin lahaayeen qorshayaashooda sinaanta midabka iyo qorsheyaasha waxqabadka. Waxay kaloo kaalmo ka geysan doontaa siday ay u jiheyn lahayd shaqooyinka mustaqbalka ee xarunta waxqabadka qaranka caafimaadka ee dadka asal ahaan laga tirada bada yahay iyadoo muujin doontaa meelaha iyo mudnaanaha u baahan haggis qaran siyaasad ahaan si ay u sii hormarin lahayd xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay. Meelahan waxaa ka mid ah: la talin, horumarinta beesha, qabashada adeegyo, shaqo bixin, helitaan, qiimeynta saameynta, qalabka wax lagu baaro, iyo tilmaamayaasha wax qabadka.

Isa soo jiidashada xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka laga tirada badan yahay: Isa soo jiidashada u dhaxeysa xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahann laga tirada badan yahay iyo guddiyada iyo kuwa xilku saaran yahay wuxuu ahaa mid miro dhal ah taasoo ay ku lammaanayd waxqabad ku soo kordhayey soo bandhigista shabakado iyo la shaqeynta kooxaha. Waxaa kaloo diiwaan gashay soo kordhis codsoshada gooni goonida ah ee la codsanayo la talin iyo kaalmo.

Shabakado: Waxaa soo kordhaya heelanaanta iyo doorka shabakadaha wax hogaamiya. Tan waxaa kordhiyey booqashooyin ay sameeyeen shaqaale ka socda xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay booqashooyinkaas oo ay ku sameeyeen guddiyo caafimaad oo gooni gooni ah. Qorshaha shaqo ee xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay wuxuu kusii hormarayaa, macluumaad, tababaro iyo siyaasadda shabakadaha iyo shaqooyin gaar ah taasoo ay keenayso shabakado la qaabeeyey oo ay howlgeliyaan guddiyada iyo kuwa xilku saaran yahay.

Shaqooyinka adag: Kuwan waxaa ka mida ah la socodka ajendeyaasha siyaasadeed ee sida deg dega ah isu bedelaya gaar ahaan maamulayaasha midowga yurub (EU) iyo la tashiga hay'daha sinaanta; baahida loo qabo kala duwaanshaha muuqda marka laga hadlayo sinaanta midabka iyo is-dhexgalka busho ahaaneed; wax ka qabashada takoorka laga siman yahay; abuurista wada xiriir wanaagsan oo u dahxeeya ururada iyo hubinta isbedello la qiyaasi karo.

Tilmaamid: Xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay waxay dhiiri gelin doontaa ka qeyb qaadashada beelaha asal ahaanta laga tirada badan yahay waxayna hubinaysaa in la siiyo fursado dhab ah si ay uga ciyaaraan door firfircoon horumarinta shaqada xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay. Waxaa la kordhin doonaa hubinta sidii loo wadaagi lahaa waxqabad wanaagsan iyadoo wadajir loo wada shaqeynayo iyo mataaneynta fursadaha. Xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay waxay u shaqeynaysaa sidii ay u soo saari lahayd haggis heer qaran ah, abuurista waxqabad tilmaamayaal, iyo hadafyo lagu qiyaaso isbedellada wax qabad ahaaneed, iyo la shaqeyn dhab ah oo lala shaqeynayo ajendooyinka heerka qaran ah ee ku meeraysan kala duwanaanshaha sida Diirrad saarista bukaanka iyo Ka qeybqaadashada Bulshada.

Ururada caafimaad ee muhiimka ah ee ay kaalmeyso xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaan laga tirada badan yahay waxa weeye guddiyada adeegyada caafimaadka qaranka iyo kuwa xilku saaran yahay. Si kastaba ha'ahaatee xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafimaadka dadka laga tirada badan yahay waxay abuuraysaa xiriiro muhiim ah oo ay leedahay qeybaha qabta howlaha iskaa waxu qabsada , dowladda hoose iyo hay'adaha la aqoonsan yahay ee kale.

Gunaanad (gebagebayn):

Iyadoo la adeegsanayo rabitaan siyaasadeed, socodsiin maamulenimo, haggis adag lakin gaar ah iyo sharciyo, iyo fidin rajo wanaagsan oo ka dhacda gudaha adeegyada caafimaadka qaranka ee Scotland ayaa keentay horumar la taaban karo oo ku aaddan si loo xalin lahaa, siyaasadda dhibka badan iyo howlaha istiraatiijiyad ahaan adag oo ay la iman karto higsiga la higsanayo si loo abuuro adeegyo caafimaad oo ka jawaaba baahida ay abuurto badnaanta kala duwanaanshaha asalka, bulsho dhaqamo fara badan leh. Haddii la doonayo in lasii wado dardartan, istiraatiijiyadda waa in loo arkaa mid loogu tala galay waqtiga fog waxaana loo baahan yahay in diiradda lagu hayo mudnaanaha sida wada jirka ah loo gula heshiiyey ka qeyb qaatayaasha.

Waxaanu dhamaystirnmay dib-u-eegisteedii ugu horreysay ee sannadlaha ahayd ee guddiyada taasoo la xiriirtay sinaanta midabka. Qodobada waaweyn ee ka soo baxa baaristaan ayaa naga caawin doona sidii diiradda loo saari lahaa shaqadayada sannadka 2add iyo kan 3aad.

- Maadaama aanu abuurnay hogaamin muuqata oo xagga istiraatiijiyadda ah, waxaanu iminka rajeynaynaa inaanu aragno wax qabad ka yimaada shaqaalaha hagga maamulka iyo hirgelinta.
- Guddiyadu waxay sameeyeen inay muujiyaan xaaladda ay ku sugan tahay beeshu, waxayna qabteen qiimeyn baahida caafimaad ee dadka asal ahaanta laga tirada badan yahay. Waxaanu iminka u baahanahay inaanu abuuro qalab kala duwan oo naga caawiya howlaha saameynta qiimeynta caafimaad. Iyo sidoo kale in la sameeyo aasaas heer qaran ah oo baaritaan
- Qorshayaasha waxqabad waxay soo sareen gondaloolooyin waxayna sugeen meel laga duulo; Guddiyada waxaa agu dhiiri gelinayaa inay horay u socdaan sida ugu dhaqsaha badan ee suurta galka ah marka la eego arrintan, si ay u hubiyaan waxqabad dhaqan ahaan dhamaystiran oo ah dhinaca daryeelka gaarka ah oo ay ku jirto la xiriirista, cuntada,daryeelka ruuxiga ah iyo u doodis.

- Tababarista iyo waxbarashadu waxay ka mid ahaan doonaan horumar muuqda oo urur ahaaneed oo ka jira heerar fara badan, baris, shaqaalaha safka hore, wax qabad ah kasoo horjeesiga xaqirista oo ay sameeyaan maamuladu, horumarin xirfadeed, iyo fursado hagitaan oo ay helaan shaqaalaha asal ahaanta laga tirada badan yahay.
- Kaalmo iyo haggis ayaa la bixin doonaa kuwaasoo la xiriira la tashiyo natiijo leh oo fara badan iyo soo dhoweynta isticmaalayaasha kasoo jeeda dadka asal ahaan laga tirada badan yahay; fursado ayaa loo abuuri doonaa wada jirka deegaan ahaaneed iyo mataaneynta si loo wadaago tusaalooyinka waxqabad wanaagsan.
- Waxaanu hubin doonaa in arrimaha sinaanta jinsiyadda in goobaha miyiga ah lagu baahiyo fikrad ahaan gudaha hey'adaha dhexdooda iyo in laga hadlo baahida kooxaha asal ahaan laga tirada badan yahay taasoo ah qeyb ka mid ah ajendi bulsho kusoo daris.

Doorka muhimka ah ee xarunta waxqabadka qaranka ee loogu tala galay caafiamadka dadka asal ahaanta laga tirada badan yahay waa mid durba muuqda. Mid ka mid ah howlaha adag ee sannadka soo socda waa xoojinta qaabka guddiyada adeegyada caafimaadka Scotland ee cusub dhexdooda. Kan iyo howlo kale oo adagi waxay ka mid ahaan doonaan sii waditaanka kaalmada maamulka Scotland, ururada shaqaalaha, hey'adaha xirfadleyaahsa ah iyo ugu muhiimsanaantii bukaanada. Ma ay jiri karo sahlasho maxaa yeelay howsha ugu adagi waa dhaqan gelinta wajiga aynu hadda bilownay.

Astron B31473 9-03 Somali